

## **Hadaan sharciga waajinimada-waxbarasho la dhowrin**

UU ayaa laga rabaa inay la socdaan, in qofkaan dhalinyarada ahi soo buuxiyo waajinimada-waxbarasho.

Hadaan la dhowrin waajibnimadii waxbarashada, markaas UU waxay cunugaan usoo jeedinaayaan da-daal gooniya, kaasoo qofkaan dhalinyarada ah gaarsiinaaya inuu waxbarashada diyaar unoqdo.

Lacagta ilmaha ee qoyska la siiyo inta udhexaysa 15 – 17 jir, waxaa loo bedelaayaa lacagta dhalinyaradu qaadata ee la siiyo bilkasta reerka. Kumuunuhu wuxuu gaari karaa go'aanka ah, in lacagta cunuga magaciisa lagu bixiyo inla joojiyo, hadii cunugaani uusan raacin qorshihii waxbarasho ee loo sameeyay.

UU wuxuu rabitaankoodu yahay inay kaalmo iyo isgarabtaagidba siiyaan ilmaha dhalinyarada ah oo dhan, gacanna ka gaystaan sidii ay waxbarasho diyaar ugu noqon lahaayeen.

Dhalinta oo dhan iyo waalidkood waa ufulan tahay inay lasoo xiriiraan UU, waydiiyaana su'aalaha ay qabaan.

**UU waxaa lagala soo xiriiri karaa  
Tlf. 89 40 59 75.**

Wixii aqbaara ee intaas ka badan, kuna saabsan UU waxaad ka heli kartaa bogga internetka ay UU Århus-Samsø leeyihiin ahna: **uu-aarhus.dk**



Wargelin loogu talagalay waalidiinta kuna saabsan

**Waxbarashada-waajibka looguna  
talo galay dhalinyarada 15jir ilaa 17jirka ah**

**Dhalinyarada talo ka siinta dhinaca waxbarashada, lana yiraa  
UU Århus – Samsø  
August 2010.**

## **Qiimaynta waxbarasho udiyaarsanaanshaaha**

Dhalinyarada dhan ee ku dhameeysa iskoolada aasaasiga ah fasalada 9aad ama 10aad, waxaa laga rabaa wixii ka dambeeya 1janaayo 2011, inla qiimeeyo sida ay diyaarka ugu yihiin sii waditaanka waxbarashada dhalinyarada.

Cunugaan dhalinyarada ahi waxaa laga rabaa, in asagoo kaashanaaya la taliye ka socda dhanka UU-vejleder oow dejiyo qorshihiiisa waxbarasho, markaasna UU vejleder qiimeeyo, in cunugaani diyaar uyahay bilaabitaanka waxbarashada la qorsheeyay.

## **Qiimayn laga duulaayo dhinaca maadooyinka, bulshanimada iyo awoodiisa qof ee u dhinacyadaan oo dhan ku yahay**

Qiimayntu waxay udhacaysa marka la fiirsho biloow la bilaabay waxbarasho mihnadeed ama waxbarasho dugsi sare.

UU haday ay qiimayso in cunugaani uusan waxbarasho diyaar u ahayn, waxaa cunugaan /waalidkuba dalban karaan, in xarunta waxbarasho ay samayso qiimayn cusub.

Cunugaan dhalinyarada ahi ee loo aqoonsado inuusan waxbarasho diyaar u ahayn, waa in UU ay u sameeyaan nidaam keenaaya in cunugaani diyaar u noqdo waxbarasho.

Wax dambe oo qiimayn ah lama samayn doono, hadiiba cunugaani ka qayb qaato nidaamka ay UU usoo jeediyeen.

Gunaanadka wixii qiimaynta kasoo baxa, waa inla ogyahay intaan layska qorin waxbarashada dhalinyarada bilaabi doonta.

## **Waajibnimada-waxbarasho**

Ka bilaabato 1. januar2011 ilmaha dhan da'dooduna udhexayso 15 – 17jir waxaa waajib ku ah inay waxbarasho gacmaha kula jiraan.

## **Sidaan ayuu cunugu ku buuxin karaa waxbarashada waajibka ah**

Si uu cunugu ubuuxiyo waajibnimada waxbarasho, waa inuu raacaa qorshihii waxbarasho ee loo sameeyay. Ardayda oo dhan ee ka baxeeysa fasalada 9aad ama 10aad waxay samaynaayaan qorshe waxbarasho.

Qorshaha waxbarasho ayadoo lala tashanaayo UU-vejlederen waa la sixi karaa, hadii baahida waxbarasho ee cunugu isbedesho ama baahida uu uqabo kaalmo gaaraba.

## **Cunugaan dhalinyarada ahi wuxuu waajibnimadii waxbarasho ku buuxin karaa asagoo bilaaba**

- Mid ka mida waxbarashooyinka dhalinyarada.
- Ka qayb qaata howl dadaal ah oo udiyaar garaynaysa waxbarasho.

## **Cunug ubaahan kaalmo gooniya**

Kumuunaha isagoo la tashanaaya waalidka masuuliyada leh, wuxuu cunuga ka cafin karaa waajibnimadii waxbarasho, kadib qiimayn gooniya oo cunugaan lagu sameeyay. Sababta loo cuskaday cafintuna waxay noqon kartaa dhibaato jirro keentay, curyaanimo ama dhibaatooyin bulsho culayskoodana leh. Ka cafintaanina waxay noqon kartaa mid abid ah ama ku meelgaar ah.